




Imagine better health.SM

Tilmaamaha Horimarinta

(Advance Directives)

Somali



Shaqo

Shaqada Catholic Health Initiatives waa inay dhiiri galisaa dabiibaba kiniisada, taas oo lagu taakulaynayo aqoon iyo daraasad. U hogaansanaanta gospel ku waxay noo sheegeysaa in diirada la saaro sharafta bilaa aadanka iyo cadaalada bulshada si aynu u abuurno bulsho caafimaad qabta.

Markaynu joogno CHI Health, waxaa naga go’an inaanu daryeelka ku dhagaysano codka bukaankaayaga. Waxaanu ogsoonahay inay jiraan wakhtiyo ayna bukaankaayagu goaan qaadan karin maadaama oo ay xanuunsanayaan ama xaalad lamid ah ku jiraan. Wakhtigan oo kale, warqada Tilmaamaha Horimaru waxay noqon kartaa mid ay kaashadaan dadka qaadanaya go’aanka daryeelka caafimaad iyo dawaynta ee bukaanka matalaya.

Buugani waxa ku duugan xog iyo foomam la buuxinayo oo ku saabsan Tilmaamaha Horimaru ee daryeelkaaga caafimaad ee guur. Si aad u buuxiso foom gaar ah oo caafimaadka maskaxda ah oo Tilmaamaha Horimaru ah, boogo websayta CHI Health (www.CHIhealth.com/advancedirectives) ama kala hadal xubin daryeelkaaga caafimaad ah.

Hadii aad hore u haysato warqad Tilmaamaha Horimaru ah, fadlan la socodsii dhakhtarkaaga ama daryeel caafimaad bixiyahaaga si ay kuula eegaan oo ay nuqul Tilmaamaha Horimaru ahna ugu daraan duwaankaaga caafimaad.

Shaxda macluumaadka

Su’aalaha Soo Noqnoqda Ku Saabsan Tilmaamaha Horimaru.....	2
Waraaqaha Tilmaamaha Horimaru ah.....	7
Tilmaamaha Ka Hadalka WaraaqahaTilmaamaha Horimaru ah	13
Qeexida Mabaadii’da aad Aaminsan Tahay iyo Rabitaankaaga	15
Tixraacyo	16
Kaadhka Boorsada Jeebada	17

Hadii aad wax su’aal ah qabto intaad akhrinayso buugan fadlan waydii xubnaha kooxdaada daryeelka caafimaad ama la xidhiidh Xarunta Anshaxa CHI Health:

EthicsCenter@alegent.org ama 402-343-4476

Su'aalaha Soo Noqnoqda Ku Saabsan Tilmaamaha Horimarinta

Waa maxay waraaqaha “Tilmaamaha Horimarinta ahi”?

Waraaqada Tilmaamaha Horimarinta waa:

- » Waa waraaqo sharci ah oo aad ku buuxinayso waxaad doonayso ee ku saabsan daryeelkaaga caafimaad iyo dawayntaada aad kula socodsiiinayso dadka kale hadii ay timaado wakhti aanad go'aan adigu qaadan karin.
- » Waxaa loo yaqaanaa “Tilmaamaha Horimarinta”, maadaama oo wakhti hore lasii buuxiyo khuseeyaana wakhti aanad adigu go'aan gaadhi karin.
- » Waxay kuu sahlayaan inaad hagi karoto daryeelkaaga caafimaad iyo dawayntaada mustaqbalka.

Ma igu khasabaa inaad buuxiyo Tilmaamaha Horimarinta ah si aad daryeelka guud ee caafimaad u helo?

Maya. Khasab kuguma aha inaad buuxiso waraaqada Tilmaamaha Horimarinta si aad u hesho daryeelka caafimaad. Buuxinta waraaqada Tilmaamaha Horimarinta ah kahor daryeelka caafimaad waxay u sahlayaan kooxda daryeelka caafimaad kusiinaysa inay ogaadaan siday kuu dawaynayaan mustaqbalka.

Yaa buuxin kara Tilmaamaha Horimarinta ah?

Qof kasta oo wayn ama ilmaha yare e kaligii ah awoodna u leh inuu go'aan qaadan karo ayaa buuxin kara waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta.

- » Hadii aad dagan tahay Iowa, “qof wayni” waa in ugu yaraan uu 18 yahay.
- » Hadii aad dagan tahay Nebraska, “ qofka wayni” waa in uu ugu yaraan 19 jir yahay ama uu xaas soo maray.

Xog sidee ah ayaa ku jirta waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah?

Badi waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah waxaa ku duugan xogta sidaan u doorbidayso daryeelkaaga caafimaad iyo daawaynta, iyo cidaad jeceshahay inay go'aan ka gaadhaan daryeelkaaga caafimaad iyo daawayntaada hadii aanad adigu go'aan gaadhi karin. Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta qaar waxaa ku jirta xogta waxyaabaha adigu aad ku qanacsan tahay iyo waxaad ka doonayso daryeelkaaga caafimaad, khasaatan dhamaadka nolohaada.

Noocyada xogaha caanka ah ee ku jira waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta waa:

- » Awood Qareen Oo Joogto ah oo Daryeelka Caafimaad ah: Xogta cida goaanka ka qaadanaysa daryeelkaaga caafimaad iyo daawayntaada marka aanad adigu qaadan karin. Qofkan waxaa sidoo kale loo yaqaan go'aan qaataha badalka ah(ama “Qareenkaagaaga dhabta ah”).
- » Awood Qareen Oo Joogto ah oo Caafimaadka Maskaxda ah: Xogta cida aad doonayso inay go'aan ka qaadata ee adiga ku matalaysa gaar ahaan daryeelkaaga caafimaad iyo daawaynta maskaxda. Guud ahaan, hadii aanad cid magacaabin go'aanka ka qaadata gaar ahaan daryeelkaaga caafimaad iyo daawaynta aad ugu baahan tahay xanuunada maskaxda, qofka badalka go'aan qaataha ee ku qoran daryeelkaaga caafimaad iyo daawayntaada guud ayaa go'aanka qaadanaya isaga oo ku matalaya.

Hadii aad u baahan tahay xog dheeraad ah oo sida loo buuxiyo waraaqaha Awood Qareen Oo Joogto ah ee Caafimaad Maskaxda, fadlan la xidhiidhi xubnaha daryeelka caafimaad ama kala xidhiidh Xarunta Anshaxa CHI Health EthicsCenter@alegent.org ama at 402-343-4476.

Go'aan qaataha badalka ah

Go'aan qaataha badalka ahi waxa jirta masuuliyado saran:

- » In uu la sheekeysto dhakhtarka iyo xubnaha kale ee daryeelka caafimaad bukaanka si uu wax uga ogaado ikhtiyaarada daryeelka caafimaad iyo daawaynta.
- » In uu qaato go'aan matalaya mabaadii' da bukaanka aaminsan yahay (waxaa loo yaqaanaa “heerka go'aaminta badalka ah” ee go'aan qaadashada).
- » In AANU qaadan go'aan uu bukaanku diidavo.

Daawaynta Noloshaha Dheeraysa

(Sida uu dhigayo sharciga Gobolada Iowa iyo Nebraska)
Daawaynta Noloshaha Dheeraysa waxaa lagu sharaxaa xaalad caafimaad, daawaynta, ama baajin iyada oo la isticmaalaya kiimiko ama waxyaabo kale oo macmal ah si loosii wado shaqa, dib loogu soo celiyo ama loogu badalo shaqada muhiimka ah taas oo marka qofka lasiiyo kujira xaalad adag xanuun kala go' lahayn, taas oo loo adeegsanayo si loosii dheereeyo dhimashada.

Xaalad Adag

(Sida uu dhigayo sharciga Gobolada Iowa iyo Nebraska)
X **aalad Adag** waxaa lagu sharaxaa xaalad aan la dawayn karin ama la badali karin taas oo, hadii aan qofka lasiin wax noloshaha u dheereynaya, horseedaysa dhimasho mudo gaaban ah; ama **xaalad miyir la'aan joogto ah** taas oo, marka isha caafimaadka lagu eego laga aamino, in aan lagasoo toosaynin.

Xaalad Qalafsan

(Sida uu dhigayo sharciga Gobolka Nebraska)
X **aalad Qalafsan** waa xaalad caafimaad oo ay keento xanuuno, dhaawac, ama cudur oo horseeda in guud ahaanba miyir doorsoon ah oo aan waxba laga badali karin iyo awoodii caqliga wax lagu kala garanayay oo meesha ka baxda. Bukaanku guud ahaanba naftiisa waxba kama oga, deegaanka

go'aan qaatayaasha badalka ah ("Qareenkaaga runta ah"), taas oo ay ku xidhan tahay sharciga kolba gobolka aad dagan tahay.

Kaliya dadka Nebraska dagan

- » Mulkiile ama maamul xarun daryeel oo bulshada ah oo aan qoyska ahayn taas oo aanad bukaan ka ahayn ama aanad daganayn looma magacaabi karo go'aan qaatahaaga badalka ah ("Qareenkaaga dhabta ah").
- » Qofkii aan qoyska ahayn kaas oo, wakhtiga aad buuxinaysay Tilmaamaha Horimarinta, u ah go'aan qaate dad kale ("Qareenka runta ah") tobon qof ama dad kabadan looma magacaaban karo go'aan qaate badal ah ("Qareenkaaga runta ah").

Dadka dagan Iowa iyo Nebraska

- » Daryeel bixiyahaaga ku daweeyaa looma magacaabi karo go'aan qaataha badalka ah ("Qareenkaaga runta ah").
- » Shaqaale xarunta daryeelka caafimaad ee lagugu daweeyo ama xarunta kale oo daryeel ah oo aan qoyska ahayni loomaa magacaabi karo go'aan qaataha badalka ah ("Qareenkaaga runta ah").

- » **Cadaynta Dardaaranka Sii Noolaanshaha:** Xogta ku saabsan rabitaankaaga **wixii noloshaha dheeraynaya** dhamaadka noloshaha hadii aad **qabta xaalad adag, xaalad qalafsan oo joogto ah, ama xaalad miyir la'aan joogto ah** taas oo aanad kasoo toosaynin.

Foomka Tilmaamaha Horimarinta ahi ee buugan waxa uuka kooban yahay Awooda Qareenka Joogtada ah ee Daryeelka Caafimaadka iyo Cadaynta Dardaaranka Sii Noolaanshaha oo warqad kaliya ah weeyaan si laguugu fududeeyo.

Yaan u magacaabi karaa inuu ahaado go'aan qaatahayga badalka ahi?

Waxaad u magacaabi kartaa cida aad doonto inay noqoto go'aan qaatahaaga badalka ahi ("Qareenkaaga runta ah"), hadii ayna kahor imanaynin sharciga gobolka. Maaha khasab in uu qofkani qareen yahay.

Dadka hoos ku taxani waa dadka aan waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah loogu magacaabi karin inay noqdaan

Maanka kuhay Markaad Dooranayso Go'aan Qaate Badal ah:

- » Maku kalsoonaan kartaa in uu qofkani go'aanka kuu gaadho?
- » Qofkani mabaadii'daada, waxaad aaminsan tahay iyo doorashadaada maka jawaabayaa marka uu qaadanayo go'aanka daryeelkaaga caafimaad iyo dawayntaada?
- » Qofkani si adag ma ugu ololaynayaa mabaadii'daada, waxaad aaminsan tahay iyo doorashadaada?
- » Qofkani m yahay mid la heleyo oo kooxda daryeelka caafimaad kala hadli karta arintaada?
- » Qofkani ma fahansan yahay waxa adiga kugu wayn?
- » Qofkani iminka makaala taliyaa xaaladaha adag oo ma dhagaystaa doorashadaada?
- » Qofkani wixii muran ah ee ka dhax dhasha xubnahaaga qoyska iyo xubnaha daryeelka caafimaad maxalin karaa?

Yaa qaadanaya go'aanka hadii aanan cid ku magacaabin go'aan qaate badal ah waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah?

Hadii aanad magaabin go'aan qaate badal ah, dhakhtarkaaga iyo daryeel bixiyahaaga caafimaadka ah ayaa eegi doona inay kuwa soo socdaa go'aan ka qaataan daryeelkaaga caafimaad:

- » Xaaska
- » Caruurtaada qaan gaadhay (isku duubnaan)
- » Waalidkaa
- » Walaaladaa
- » Cidkale ee qaraabo kuugu dhaw
- » Hadii aad doonayso in cid aan ahayn qofka liiskan ugu sareeyaa inuu go'aan uu kugu matalo qaato, waxaad ku magacaabi kartaa waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah qof go'aan qaate badal ah.

Sharciga Nebraska iyo Iowa, ma hirgalayo Cadaynta Dardaranka Noloshu hadii gabadhu ay uur leedahay oo ay macquul tahay in uu ilmuhu koroyo ilaa uu ka dhalanayo taas oo gabadhaas lasii siinayo daawaynta cimrigeeda lagu dheereynayo.

Goorma ayay dhaqan gal noqdaan Tilmaamaha Horimarintu?

Doorashada aad ku samayso waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah waxay dhaqan gal nolonayaan taariikh marka hore lagu sheegey Tilmaamaha Horimarinta ah, ama goorta uu dhakhtarkaagu cadeeyo in aanad go'aan gaadhi ka gaadhi karin daryeelkaaga caafimaad, ama hadii uu dhakhtarkaagu sheego in aanad awood u lahayn in aad go'aan gaadho. Sidoo kale, sida uu dhigayo sharciga Iowa iyo Nebraska, maaha in uu dhaqan gal noqdo Cadaynta Dardaranka Noloshu ilaa:

Kadib marka ay ka wada hadlaan daryeel bixiyaha iyo go'aan qaataha badalka ahi, waxa kale oo taageero dheeraad ah noqonaysa in lagala hadlo xubnaha qoyska ee kale, asxaabta ama cidii xidhiidhka gurmada degdega kuugu qornayd, rabitaankaaga daryeelkaaga caafimaad iyo daawaynta. Tani waxay baajin kartaa in uu muranka dhaco marka la qaato go'aanka daryeelkaaga caafimaad iyo

- 1) Dhakhtarkaaga ama daryeel bixiyahaaga gacanta usoo gasho nuqul Cadaynta Dardarankaaga Noloshu ahi;
- 2) Dhakhtarkaaga ayaa sheegey inaad ku jirto *xaalad adag* ama inaad ku jirto *Xaalad qalafsan*, taas oo isticmaalka waxyaabaha noloshu dheereeyaayi ay kaliya dheeraynayaan wakhtiga dhimashadaada;
- 3) Dhakhtarkaaga ayaa go'aamiyaya in aanad go'aan ka gaadhi karin daryeelkaaga caafimaad; sidoo kale
- 4) Dhakhtarkaagu wuxuu wargaliyay go'aan qaatahaaga badalka ah, cida ku daryeesha, ama ama macquulka ah ee laga heli karo qoyskaaga dhaw kaas oo loogu talo galay in uu dhaqan galiyo rabitaankaaga aad ku sheegtay Cadaynta Dardarankaaga Nololeed.

Siday dhakhtarkaygu ama daryeel bixinhaygu iyo go'aan qaatahayga badalku u ogaanayaan waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta sideyna u tix galinayaan rabitaankayga daryeelka caafimaad iyo daawayntayda?

Adiga ayaa kamasuul ah inaad nuqul ka siiso waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta dhakhtarkaaga iyo go'aan qaataha badalka ah, si ay u ogaadaan oo ay u tixgaliyaan rabitaankaaga daryeelka caafimaad iyo daawayntaada. Sidoo kale adiga ayaa kamasuul ah inaad wargaliso dhakhtarkaaga iyo go'aan qaatahaaga badalka ah waraaqahaaga Tilmaamaha Horimarinta ah, taas oo ay kamid tahay mabaadii'daada, waxaad aaminsan tahay iyo rabitaankaaga. Xogta iyo foomamka buugan waxay kaa caawin doonaan xogta aad tabinayso.

Goorma ayuu go'aan qaatahayga badalka ahi qaadanayaa go'aanka daryeelkayga caafimaad iyo daawayntayda?

Adiga oo si kale sheega mooji e, go'aan qaatahaaga badalku waxa uu go'aan ka qaadanayaa daryeelkaaga caafimaad iyo daawayntaada marka la go'aamiyo in aanad go'aan gaadhi karin.

Yaa cadaynaya in aanad go'aan ka gaadhi karin daryeelkayga caafimaad?

Dhakhtarkaaga iyo daryeel bixiyahaaga ayaa sheegi doona hadii aad wax fahmayso oo aan go'aan daryeelkaaga caafimaad ah bixin karto. Waxay kadibna ku kaydin doonaan xogtan duwaankaaga caafimaad. Tani waxaa loo yaqaan "sheegida awoodaada go'aan qaadasho". Haddii ay go'aamiyaan in aanad awood u lahayn in aad go'aan gaadho, go'aan qaatahaaga badalka ah ayaa bilaabaya in uu go'aanada kuu gaadho.

Haddii ay isku af garan waayaan daryeel bixiyayaashaadu awoodaada go'aan qaadasho, waxay kala tashan karaan dhakhtar cilmi nafsii ama cid kale oo khariib ah si ay uga kaalmayso. Mararka qaar waxaa dhacda in uu xaakin go'aamiyo awoodaada in aad go'aan gaadhi karto iyo inkale.

Sideen ku ogaanayaa in la tixgalinayo rabitaankayga daryeelka caafimaad iyo daawayntayda ku duugan waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta?

Dhakhtarkaaga ama daryeel bixiyahaaga iyo go'aan qaatahaaga badalka ah ayaa muujin doona dadaal in u raacayaan rabitaankaaga ku duugan waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta. Haddii aan la raaci karin rabitaankaaga, kooxdaada daryeelka caafimaad ayaa isla eegi doonta ikhtiyaaro kale adiga ama go'aan qaatahaaga badalka ah, taas oo ay kamid tahay sidii laguugu wareejin lahaa daryeel bixiye kale ama hay'ad daryeel bixiye kale ah. Sababaha aan loo raaci karin Tilmaamahagaa Horimarinta ah waxaa kamid ah:

- » Khatar waxyeelo adiga ama dadka kale u leh
- » Khayraadka hay'da oo yar
- » Walaac sharci ama anshax

Mala isiinayaa dawooyinka kaar jabiyaha ah ama waxyaabihii kale lamidka ah hadii waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ay ku jiraan duwaankayga caafimaadka?

Adiga oo ku qora waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah wax kaduwan sidaasi moojee, dhakhtarkaaga iyo daryeel bixiyahaaga waxay kuusii wadi doonaan inay ku siiyaan daawayntaada kugu munaasibka ahee xanuunkaaga iyo wixii lahal maalaba ah, si fiican ayayna kuu hayn doonaan.

Ma badali karaa waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah markaan buuxiyo kadib hadii rabitaankayga isbadal ku yimaado?

Waad badali kartaa waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah wakhtigii aad doonto ee uu isbadalo rabitaankaaga daryeelka caafimaad iyo daawaynta adiga oo ku daraya waraaqahaagii hore ama kuwa cusub buuxinaya. Xasuusnaw inaad nuqul waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee cusub ama kuwa wax lagu daray ah aad gaadhsiiso dhakhtarkaaga ama daryeel bixiyahaaga iyo go'aan qaatahaaga badalka ah.

Maka noqon karaa, ama meesha maka saari karaa, waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah?

- » **Dadka dagan Iowa:** Waxaad ka noqon kartaa wakhtiga aad doonto Cadaynta Dardaarankaaha Noloshaha iyo Awooda Joogtada ah ee Qareenka ee Daryeelka Caafimaad iyada oo aan la eegaynin awoodaada go'aan qaadasho*, adiga oo hadal ama qoraal ugu sheegaya dhakhtarkaaga ama daryeel bixiyahaaga iyo go'aan qaataha badalka ah.
- » **Dadka dagan Nebraska:** Waxaad ka noqon kartaa Awooda Qareenka ee joogtada ah ee Daryeelkaaga Caafimaad kaliya markaad awood go'aan qaadasho aad leedahay, iyo sidii kale ee aad ku sheeganayso inaad doonayso inaad ka noqoto Awooda Qareenka Joogtada ah ee Daryeelka Caafimaad. Wakhtiga aad doonto ayaad ka noqon kartaa Cadaynta Dardaarankaaga Noloshaha iyada oo aan loo eegaynin awoodaada go'aan qaadasho ama xaaladaada jidheed.*

Markaad U Diyaar Garawdo Inaad Buuxiso Tilmaamaha Horimarinta ah:

- » Waxaad isla eegtaa mabaadi'daada shakhsi ahaaneed iyo diimeed ee noloshada, iyo waxaad qiimayso.
- » Waxaad isla eegtaa daryeelka caafimaad iyo daawaynta aad doonayso ama kuwa aanad doonaynin in lagu siiyo hadii aanad sheegi karin dabitaankaaga.
- » Waxaad wax kasii ogaataa ikhtiyaarada daryeelka caafimaad iyo daawaynta go'aan qaatahaaga badalka ah la waydiin karo hadii aanad go'aan ka qaadan karin laftaadu.
- » Waxaad kala tashataa dhakhtarkaaga iyo daryeel bixiyahaaga si aad suaalaha aad qabto uga waydiiso ulana wadaagto mabaadii'daada, waxaad aaminsan tahay iyo doorashadaada khuseeya daryeelkaaga caafimaad iyo daawayntaada.
- » Kala sheekeyso go'aan qaatahaaga badalka ah iyo cidii kale ee kugu dhaw dhaw madaadii'daada, waxaad aaminsan tahay iyo rabitaankaaga si ay u qaataa go'aan aad oqoshahay.

Maadaama oo shuruucda goboladu kala duwan yihiin, hadii aan mudo kooban ku nooshahay gobol kale, waa inaad ku talo gashaa inaad buuxiso waraaqo Tilmaamaha Horimarinta ah oo u dhigma shuruucda gobolkaa. Kala tasho wixii xo gee dheeraad ah daryeel bixiyaha gobolkaa.

**Waraaqaha buugani waxa uu kusiinayaa ikhtiyaarka sheega in aad ka noqon karto waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah(Iowa) iyo Cadaynta Dardaaranka Nololsha (Nebraska) kaliya markaad leedahay awood go'aan qaadasho.*

Ma waxaan u baahanahay qareen si aad u buuxiyo waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah?

Ma jiro sharci dhigaya gobolada Iowa iyo Nebraska aad ugu baahan tahay qareen marka aad buuxinayso waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah. Uma baahnid qareen si aad u buuxiso waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee buugan ku jira, kaliya waa inaad saxeeddid, oo aanu anakuna markhaati ka noqono ama cidii kale eek u munaasabka ah. Dadka qaar ayaa doorbida qareen, balse hadii aad wax suaal sharci ah qabto, waad la xidhiidhi kartaa qareen.

Yaa markhaati ii noqon kara marka aan saxeeexo waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah?

Shuruucda goboladu way kala duwan yihiin cida markhaatiga noqonaysa.

- » **Dadka dagan Iowa:** Markhaati kastaa ugu yaraan waa in uu 18 jir noqdaa, waana in aanu noqon shaqaale daryeel caafimaad bixiye ama cid u shaqaysa daryeel bixiyaha caafimaadka qofka buuxinaya waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah. Qof kaliya ayaa noqon kara dadka qaraabada u ah qofka buuxinaya waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah.
- » **Dadka dagan Nebraska:** Markhaati kastaa waa in uu ugu yaraan 19 jir noqdaa, waana in aanu noqon xaaska, waalidka, ilmaha, caruurta awowga loo yahay, walaalaha, dadka wax dhaxlaya, ama dadka loo yaqaan dardaaranka (qof loo dar uu qofku u dardaarmay in hantida dhaxalkiisa wax laga siiyo); ama dhakhtarka qofka buuxinaya waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah; go'aan qaataha badal ah ee qofka

saxeeexaya ("qareenka runta ah") waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah; ama shaqaale shirkad caymiska nololsha ah. Sidoo kale, hal qof kama badan karaan markhaatiyayaasha daryeel bixiyaha caafimaadka ee ku daweeya.

Waxaad doorbidi kartaa in waraaqahan ay ansixiso nootaayo halka aad ka isticmaali lahayd markhaati.

Maadaama oo CHI Health ay tahay hay'ad Kaatoolig ah, dhakhaatiirta kahawl gashaayi ma tixgalinayaa Tilmaamaha Horimarinta ah

Hay'ad daryeelka caafimaad bixisa Kaatoolig ahaan, CHI Health waxay ku qasban tahay inay raacdo Anshaxa iyo Tilmaamaha Diinta ee Adeega Daryeelka Caafimaad bixinta Kaatooliga ("ERDs"). ERDs waa tilmaamo taxane ah oo ay curiyeen Ururka Baadariyada Kaatooliga Maraykanka oo ay ku jidaynayaan daryeelka caafimaad sida ay dhigayso Kaatooligu. Curinta waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah sida ku qoran ERDs ku waa sidan:

Tilmaamta #27: Iyada loo loo hogaansamayo sharciga fedaralka, hay'ada daryeelka caafimaadka Kaatooliga waxay bukaanka u diyaarinayaan xogta xuquuqdooda, kuwaas oo ay dhigayaan shuruucda gobolkoodu, si ay u diyaarsadaan tilmaamaha horimarinta ah daawayntooda. Balse, hay'adani tixgalin maayaan waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee kahor imanaya Kaatooliga. Hadii waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ay kahor imanayaan Kaatooliga, sharax ayaa laga bixin doonaa sababta loo raaci waayay tilmaamaha.

Markaad Buuxiso Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah:

- » La socodsii daryeelka caafimaad bixiyahaaga iyo go'aan qaatahaaga badal ah xogta aad ku qortay waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah.
- » Nuqul waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah sii dhakhtarkaaga ama daryeelka caafimaad bixiyahaaga iyo go'aan qaatahaga badalka ah.
- » Sii nugul dadka kale ee kugu dhaw ee taageerada cida go'aanka ka qaadanaysa caafimaadkaaga.
- » Soo qaado nuqul waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah markaad imanayso isbitaalka kaas oo aaf filanayso in lagu dhigo.
- » Meel fiican ku kaydso nuqulka guud ee waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah.
- » Kolba dib u eegid ku same waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah si aad u sugto inay ka muuqdaan rabitaankaaga wakhtigaa ee daryeelka caafimaad iyo daawayneed.

Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah (Boga 1 ee 4)

<p style="writing-mode: vertical-rl; transform: rotate(180deg);">XOGTA GO'AAN QAATAHA BADALKA AH</p>	<p>Anigu, _____, waxaan u doortay _____, cida ay cinwaankeedu tahay _____, ee taleefankeeduna yahay: (guri) _____ (moobil) _____ in uu noqdo go'aan qaatahayga badalka ah, oo waraaqahan loogu yaqaan "Qareenkayga runta ah ee Daryeelka Caafimaad".</p> <p>Waxa aan u doortay _____ cida uu cinwaankeedu tahay _____ ee uu talefoonkeeduna yahay: (guri) _____ (moobil) _____ in uu noqdo go'aan qaadahayga badalka ah ee labaad (ee waraaqahan lagu magacaabo "Qareenka runta ah ee daryeelka caafimaad") hadii qofka xaga sare magaciisu ku qoran yahay uu maqan yahay ama aanu diyaar u ahayn in uu qaato go'aanka.</p> <p>Waxaan u ogolaaday in uu heli karo xogtayda oo uu go'aan ka gaadhi karo daryeelkayga caafimaad iyo daawayntayda isaga oo i matalaya marka la cadeeyo in aanan anigu go'aan gaadhi karin. Waxaad saaray masuuliyada ah in ay u ololeeyaan mabaadii'da, waxaan aaminsanahay iyo rabitaankayga daryeelka caafimaad iyo daawayntayda.</p>
<p style="writing-mode: vertical-rl; transform: rotate(180deg);">BAAXADA GO'AAN QAADASHADA GO'AAN QAATAHA BADALKA AH</p>	<p>Waxaad fahansanahay in waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah looga jeedo si gaar ah baahidayda daryeelkayga caafimaad iyo daawayntayda guud. Wixii khuseeya xanuunada maskaxda daryeelkooda caafimaad iyo daawayntooda (sax mid kuwa hoose):</p> <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Aniga <u>maan</u> buuxin waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah gaar ah ee daryeelka caafimaadka iyo daawaynteed ee xanuunada maskaxda wakhtigan, waxaan wargaliyay qofka halkan ku qoran in uu go'aan ka gaadho daryeelkayga caafimaad iyo daawayntayda. <input type="checkbox"/> Anigu <u>waxaan</u> buuxiyay waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah gaar ah oo baahidayda xanuunada maskaxda daryeelkooda caafimaad iyo daawayntooda ah. Nuqul ayaa la heley: _____. <p><i>(Fiiro gaar ah: Kala hadal kooxdaada daryeelka caafimaad hadii aad wax suaal ah ka qabto buuxinta waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee baahida daryeelka caafimaad iyo daawaynta xanuunada maskaxda.)</i></p>
<p style="writing-mode: vertical-rl; transform: rotate(180deg);">WADAAGA XOGTA</p>	<p>Marka laga tago dadka xage sare ku taxan, waxaan ogolaanshaha siiyay dadka soo socdaa in lasiiyo xogtayda daryeelka caafimaad iyo daawayntayda:</p> <p>_____</p> <p>_____</p> <p>_____</p> <p><i>(Fiiro gaar ah: Iyada oo la eegayo shuruucda sirta ah, xarumaha daryeelka caafimaad waxay u baahan yihiin Foomka Ogolaansha HIPAA oo dheeraad ah in la buuxiyo si loo bixin karo Xogta Caafimaadka ee La Ilaaliyay.)</i></p>
<p style="writing-mode: vertical-rl; transform: rotate(180deg);">TILMAAMO DHEERAAD AH</p>	<p>Waxaan tilmaamayaa in go'aan qaatahayga badalka ah; dhakhtarkayga iyo daryeelka caafimaad bixiyahaygu u hogaansamaan tilmaamaha soo socda ee kuseeya daryeelkayga caafimaad iyo daawaynta aan u baahanahay (mid sax ikhtiyaarada soo socda):</p> <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Ma hayo tilmaamo gaar ah, waxaan u sheegayaa in go'aanka daryeelkayga caafimaad iyo daawayntaydu ku salaysnaado mabaadii'dayda, waxaad aaminsanahay iyo rabitaankayga. <input type="checkbox"/> Waxaan hayaa xogo gaar ah oo ka dheeraad ah intaan ku bixiyay waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah, taas oo tilmaamahaas ay tahay in maanka laguhayo marka la qaadanyo go'aanka daryeelkayga caafimaad iyo daawayntada.

Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah (Boga 2 ee 4)

CADAYNTA DARDAARANKA NOLOSHA

Waxaan fahansanahay in qaybtan waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ay tahay Cadaynta Dardaaranka Noloshaha taas oo u sheegeysa dhakhtarkayga ama daryeelka caafimaad bixiyayaasha kale iyo go'aan qaatahayga badalka ah rabitaankayga wixii noloshaha dheereeya ama qaliinka.

Fadlan ka dooro ikhtiyaarada soo socda:

- Waxaan doortay **IN AANAN** buuxin Cadaynta Dardaaranka Noloshaha wakhtigan, waxaan u sheegey dhakhtarkayga, cidii kale ee daryeelka caafimaad bixiyaha ah iyo go'aan qaatahayga badalka ah inay go'aan ka qaataan wixii daawayn noloshaha dheeraynaya iyo qaliinada ee ay u arkaan in loo baahan yahay kuwaas oo ay ku ilaalinayaan mabaadii'dayda, waxaan aaminsanahay iyo rabitaankayga.
- Waxaan doortay **IN AAN** buuxiyo Cadaynta Dardaaranka Noloshaha wakhtigan.

Fadlan mid ka dooro ikhtiyaarada soo socda:

- Dadka dagan Iowa:** Waxaan u sheegayaa dhakhtarkayga iyo cidii kale ee kamasulka ah daryeelkayga inay raacaan sida halkan lagu sheegey rabitaankayga. Hadii aan qabo xaalad aan la dawayn karin ama aan waxba laga qaban karin kuwaas oo keenaya dhimasho mudo yar oo gaaban ah ama xaalad miyir la'aan mudo dheer ah, taas oo ay isku raaceen dadka caafimaadku, in aan laga ladnaanaynin, waxaan doonayaa in aan noloshaha wakhtigaa la ii sii kordhinin iyada oo la adeegsanayo waxyaaba noloshaha dheereeya. Hadii aanan ka qayb gali karin go'aanka daryeelkayga caafimaad, waxaad u sheegayaa dhakhtarka I dawaynaya in uu iga daayo ama aanu isiin wixii keenaya wakhtiga dhimashada oo dib u dhaca taas oo aan kutalagalkeedu ahayn in aniga xanuunka la igaga yareeyo ama kaarka la igaga jabiyo.
- Dadka dagan Nebraska:** Waxaan u sheegayaa dhakhtarkayga iyo cidii kale ee kamasulka ah daryeelkayga inay raacaan sida halkan lagu sheegey rabitaankayga. Hadii aan galo xaalad qalafsan ama aan la dawayn karin oo aan laga soo ladnaanaynin, iyada oo la qaato waxyaabaha noloshaha dheereeya moojee, sida uu dhakhtarka i dawaynayaa aaminsan yahay, keeneysa in aan ku dhinto mudo gaaban oo aanan aniguna wax go'aan ah ka gaadhi karin daawayntayda caafimaad, waxaan u sheegayaa dhakhtar i dawaynaya, in uu raaco Sharciga Xanuunka Adag (Terminal III Act), oo uu iga daawo ama iga ilaaliyo waxyaaba noloshaha dheereeya ee uu igu dawaynayo ee aan ahayn waxyaabaha xanuunka ama damqashada la igaga yaraynayo.
- Dadka kale:** Waxaan doonayaa inaan la wadaago rabitaankayga shakhsi ahaan ee daawaynta noloshaha dheereeya iyo qaliinada ee Cadaynta Dardaaranka Noloshaha

Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah (Boga 3 ee 4)

WEEDHAYDA FAHANKA, HESHIISKA & SAXEEXIDA

WEEDHA FAHANKA

Waxaan fahansanahay warqadaha Tilmaamaha Horimarinta ah waxaan fahansahay inay mid ama labada soo socdaa ka iman karaan:

- » Waxay u sahlaysaa qofka aan u magacaabay go'aan qaatahayga badalka ah ("Qareenkayga runta ah") in uu isaga oo I matalaya go'an qaato hadii aanan awood u lahayn in aan qaato.
- » Waxa ay bixinayaan xogta rabitaankayga daryeelka caafimaad iyo daawaynta.

Waxaan sidoo kale fahansanahay in aan badali karo am aka noqon karo warqadaha Tilmaamaha Horimarinta ah marka ay jiraan xaaladaha soo socdaa:

- » **Dadka dagan Nebraska:** Waxaan badali karaa ama ka noqon karaa waraaqaha Awooda Qareen ee Joogtada ah ee Daryeelka Caafimaad wakhti aan **awooda u leeyahay in aan go'aan qaato**, iyo markaas oo aan sharixi karo in aan doonayo in aan ka noqdo. Wakhtiga aan doono ayaan badali karaa Cadayta Dardaaranka Noloshayda siday doontaba ma ahaato awoodayda go'aan qaadasho ama xaaladayda caafimaad * aniga oo wargalinaya go'aan qaatahayda badalka ah iyo dhakhtarkayga ama daryeelka caafimaad bixiyahayga.

*Ikhtiyaar dadka Nebraska Dagan:

_____ Xarfaha uruuriska ee magacaygu waxay sheegayaan in aan awood u leeyahay inaan ka noqon karo waraaqaha Cadaynta Dardaaranka Noloshayda **kaliya markaan leeyahay awood go'aan qaadasho**.

- » **Dadka dagan Iowa:** Waxaan ka noqon karaa waraaqaha Awooda Qareen ee Joogtada ah ee Daryeelka Caafimaad iyo Cadaynta Dardaaranka Nololeed aniga oo wargalina go'aan qaatahayga badalka ah ("Qareenka runta ah") iyo dhakhtarkayga ama cidii kale ee daryeelka caafimaad bixiyaha ah **awoodayda go'aan qaadasho siday doontaba ha ahaatee**.*

*Ikhtiyaar dadka Iowa Degan:

_____ Xarfaha uruuriska ee magacaygu waxay sheegayaan inaan ka noqon karo waraaqaha Awooda Qareen ee Joogtada ah iyo Cadaynta Dardaaranka Noloshayda **kaliya markaan leeyahay awood go'aan qaadasho**.

SIGNATURE OF PERSON COMPLETING THIS DOCUMENT (Required) SAXEEXA QOFKA BUUXINAYA WARAAQAHAN (Waa khasab)

Magaca Daabacaada (Printed Name): _____
Saxeexa(Signature): _____ Taariikhda(Date): _____

DIB U EEGIDA WARGADAHHA TILMAAMAHA
HORIMARINTA AH

SIGNATURES OF MY DOCTOR AND OTHER HEALTHCARE PROVIDER(S) SAXEEXA DHAKHTARKA IYO DARYEELKA CAAFIMAAD BIXIYAYAASHA KALE (Recommended)(Waa lagu talinayaa)

Waxaan dib u eegid aan ku sameeyay xogta warqadaha Tilmaamaha Horimarinta ah.

Magaca Daabacaada (Printed Name): _____
Saxeexa(Signature): _____ Taariikhda(Date): _____

Magaca Daabacaada (Printed Name): _____
Saxeexa(Signature): _____ Taariikhda(Date): _____

Magaca Daabacaada (Printed Name): _____
Saxeexa(Signature): _____ Taariikhda(Date): _____

SIGNATURES OF MY SURROGATE DECISION-MAKER(S) (MY "ATTORNEY-IN-FACT") SAXEEXA GO'AAN QAATAHA BADALKA AH ("QAREENKA RUNTA AH") (Recommended)(Waa lagu talinayaa)

Waxaan dib u eegid aan ku sameeyay xogta warqadaha Tilmaamaha Horimarinta ah.

Magaca Daabacaada (Printed Name): _____
Saxeexa(Signature): _____ Taariikhda(Date): _____

Magaca Daabacaada (Printed Name): _____
Saxeexa(Signature): _____ Taariikhda(Date): _____

Waraqaha Tilmaamaha Horimarinta ah (Boga 4 ee 4)

WEEDHA NOOTAA YADA AMA MARKHAATIGA EE FAHANKA, HESHIISKA IYO SAXEEXA

IKHTIYAARKA NOOTAA YADA AMA MARKHAATIGA (WAA LOO BAAHAN YAHAY)

Si ay waraaqahani u noqdaan sharci, **waa in aan buuxisaa mid kamid ah ikhtiyaarada hoose.**

Ikhtiyaar 1 – Nootaayo:

Qofka ikhtiyaarkan waraaqaha u buuxinayaa waa in uu saxeexiisa nootaayo mariyaa. Markan oo kale, maaha khasab saxeexa markhaati.

Gobolka _____ . Degmada _____ . Maalinta __ oo ay tahay __, 20 __, waxaa i hor yimid qof _____, shakhsi ahaan aan u aqaano qofka ku qoran waraaqaha Tilmaamaha Horiraminta ah, waxaana aaminsanahay in uu ikhtiyaarkiisa yahay fulinta dardaarankani, iyo in aanu anigu u ahayn Qareenta runta ah ee daryeelka caafimaad ama Kuxigeenka Qareenka runta ah ee lagu igamaday waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee daryeelka caafimaad. Markhaati gacantayda afka ayaana laga xidhay _____ (goobta nootaayada) degmadaa maalintaa iyo sanadka kor ku qoran.

Saxeexa Nootaayada (Signature of Notary Public)

Ikhtiyaarka 2—Cadaynta Markhaatiga:

Ikhtiyaarkani waxa uu u baahan yahay in waraaqaha qofka buuxinayaa looga baahan yahay in laba qof oo markhaati ah oo u qalma tilmaamaha hoos lagu bixiyay keeno. Markan oo kale, looma baahna nootaayo.

- » **Dadka dagan Iowa:** Markhaati kastaa waa in uu ugu yaraan ahaadaa 18 jir, waa in aanu joogin daryeelka caafimaad bixiye ama aanu u shaqaynin daryeelka caafimaad bixiyaha uu ku xidhan yahay qofka buuxiya waraaqahan. Qof kaliya ayaa noqon kara qaraaba qofka buuxinaya waraaqahan.
- » **Dadka dagan Nebraska:** Markhaati kastaa wa ain uu ugu yaraan 19 jir noqdaa, mana noqon karo xaaska, waalidka, ilmaha, ilmaha awowga loo yahay, walaalo, cida dhaxalka leh, ama cid dhaxal suge (cid uu qofka bukaanku u darbaarmay in hantida dhaxalkiisa wax lagasiyo); ama dhakhtarka daawaynaya qofka waraaqaha buuxinaya; ama qofka ku magacaaban go'aan qaataha badalka ah ("Qareenka dhabta ah") waraaqahan gudahooda; ama shaqaale shirkada caymiska nolosha siisa qofkan bukaanka ah ee buuxinaya waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah. Kama badan karaan hal qof markahtiga ah shaqaalaha daryeel bixiyaha qofkan buuxinaya waraaqaha daweeya.

Waxaanu cadaynaynaa:

- » In qofkani **Buuxinaya** waraaqahan loo yaqaan.
- » Qofka buuxinaya waraaqahan uu saxeexay ama uu qiray saxeexiisa waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah anaka oo joogna.
- » Taas oo macnaheedu tahay, dhakhtiirta dawaysa wax kamid ah loogama dhigin go'aan qaataha badalka ah ("Qareenka runta ah") ee waraaqahan.
- » In aanu shuruudihii sharciga gobolka buuxinay.

Qaybtan waxaa buuxinaya markhaatiyayaasha labada gobolba ee Nebraska iyo Iowa Degan:

Magaca Daabacaada Markhaatida 1(Witness 1 Printed Name):

Saxeexa(Signature):

Taariikhda(Date):

Magaca Daabacaada Markhaatida 2(Witness 1 Printed Name):

Saxeexa(Signature):

Ta

Qaybtan waa in ugu yaraan hal markhaati oo degan Iowa uu buuxiyo:

Waxaan sidoo kale halkan ka cadaynayaa in ciqaabta sharciga Gobolka Iowa in aanan qaraabo dhiig ah, xaas ama soo wada kori aanaan ahayn qofka buuxinaya waraaqahan, ee xidhiidhka.

Markhaati 1 iyo/2 Saxeex (Witness 1 and/or 2 Signature): _____ **Taariikhda**(Date):

Qaybtan waxaa buuxinaya kaliya qofka degan Nebraska:

Waxa aanu cadaynaynaa in uu qofku qirsan yahay in waraaqahan hirgalinteedu tahay ikhtiyaar iyo naxariis.

Markhaati 1 Saxeex (Witness 1 Signature): _____ **Taariikhda**(Date):

Markhaati 2 Saxeex (Witness 1 Signature): _____ **Taariikhda**(Date):

Xogo Dheeraad Ah Rabitaanka Daryeelka Caafimaad Iyo Daawaynta Ah (Boga 1 ee 2)

Aniga oo ah, _____, taariikhdan _____ waxaan doonayaa inaan siiyo xogta dheeraad ah go'aan qaatahayga badalka ah ("Qareenka runta ah"), dhakhtarkayga iyo daryeelka caafimaad bixiyahayga kale, waxaanan dalbanayaa in xogta la tixgaliyo marka go'aan laga qaadanayo daryeelkayga caafimaad iyo daawayntayda. Waxaan fahansanahay inay ku dadaali doonaan sidii ay u raaci lahaayeen xogtan ilaa inta ay hirgalinteedu qabasho ahaan, anshax ahaan iyo sharci ahaanba la awoodayo; taas oo ilaa inta ayna aniga ama cidkale ku keeneynin khatar ah.

Xogta guud ee aan doonayo inaad aniga iga ogaato:

Xogta maamulida xanuunka iyo ilaalinta damqashada: *(taas oo macnaheedu tahay, waxaan u aqaano maamulida damqashada ee wax ku oolka ah; isku dheeli tirka xiska oo dhan iyo maamulida xanuunka/damqashada; waxyaabaha aan adeegsado si aan damqashada iyo xanuunada kale iskaga daweeyo)*

Xogta cuntada iyo nafaqada: *(taas oo macnaheedu tahay, cuntada iyo cabitaanka aan jecelahay, rabitaankayga kaalmada nafaqo iyo ooy tirid, ama "quudinta tuunbada")*

Xogta rabitaankayga daryeelka caafimaad ee kale iyo daawayntayda: *(taas oo macnaheedu tahay, daawaynta badalka ah sida dug duugniinka, cilaajka, ama cibaadada)*

Xogta meesha aan jecelahay in aad daryeelkayga caafimaad iyo daawayntayda aan u baahanahay la igu siiyo, taas oo ay kamid tahay dhamaadka noloshu: *(taas oo macnaheedu tahay, guriga, isbitaalka, xarun daryeel oo gaar ah, koox caafimaad bixiso)*

Xogo Dheeraad Ah Rabitaanka Daryeelka Caafimaad Iyo Daawaynta Ah (Boga 2 ee 2)

Xogta daawaynta nolosha sii dheereysa: *(taas oo macnaheedu tahay, qalabka neefsashada oo mudo dheer ah oo iga caawinaya inaan mudo dheer neefsado, dawooyinka antibootiga oo la igaga dawaynayo dhaxanta)*

Waxyaabaha naftayda dajiya *(taas oo macnaheedu tahay, cibaadada ama akhriska kutubta diinta ee aan jecelahay, sawirada dadkaan jecelahay, buste gaar ah ama maro gaar ah, heesa ama sheekooyinka aan jecelahay, dadka iyo waxyaabaha aan jecelahay inay igu xeernaadaan)*

Tilmaamo gaar ah oo aniga ah:
Hibaynta Xubnaha, Unugyada, Indhaha iyo Jidhka _____

Rabitaanka Qaliinta Lagu Ogaanayo Sababta Dhimashada: _____

Rabitaanka Aaska ama Gubida: _____

Samaynta Adeega Aaska/Xuska _____

Waxaan aqoonsanahay inay xogta waraaqahani ay muhiim u tahay dadka ku lugta leh go'aan qaadashada daryeelkayga caafimaad iyo daawayntayda hadii aanan anigu go'aan qaadan karin. Iyada oo ay sababtu taas tahay, *(sax wixii ku munaasab ah kuwa soo socda):*

Waan la socodsiiyay xogtan go'aan qaadayaasha badalka ii ah:

Xogtan waan kala hadlay dhakhtarka iyo daryeel bixiyaha soo socda:

Xogtan waxaan la socodsiiyay dadka soo socda *(taas oo macnaheedu tahay, xubnaha kale ee qoyska, asxaabta, ama cida xidhiidhka gurmada degdega ah iigu qoran ee joogi karta marka go'aan daryeelka caafimaad iyo daawaynta ah la iga qaadanayo):*

Waa in aad ku lifaaqdaa foomka xogtan dheeraadka ah waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah oo aan siisaa nuqul xogtan dheeraadka ah dhakhtarkaaga, go'aan qaatahaaga badalka ah iyo cidii kale ee daryeelka caafimaad kusiisa.

Xarfaha magaca uruuriska qofka buuxinaya foomkan _____ **Taariikh:** _____
(Person completing this form initial) (Date)

Talooyinka Ka Waramida Tilmaamaha Horimarinta

U sheeg dhakhtarkaaha, daryeelka caafimaad bixiyahaaga, go'aan qaadahaaga badalka ah iyo cidii kale ee kaa garab dhadhaw muhiimiyada rabitaankaaga daryeelka caafimaad iyo daawaynta. Way adagtahay in sheekadan la bilaabo, balse. Tilmaamaha soo socda ayaa kaa caawin kara inaad sheekada ku bilawdo.

Uga Waran Go'aan Qaataha Badalka ah iyo Dadka Kale ee Kugu Dhadhaw

Markaad kala hadlayso go'aan qaatahaaga badalka ah iyo dadka kugu dhadhaw, waxaad ku bilawdaa sheekada sidan:

- » Wali kamaynaan sheekeysan rabitaankayga daryeelka caafimaad iyo daawayntayda, walaacna kama qabo inaad garan doontid nooca daryeelka aan doonayo. Ma doonayo inaad isku buuqdo hadiiba ay dhacdo inaad go'aanka adigu ii gaadho, balse waxaan rabitaankaygii ku habsaday warqad waxaanan doonayaa inaad arintaa kaaga waramo.
- » Dhakhtarkaygii waxa uu ii sheegey in xanuunkaygu aan la dawayn karin. Waxaan doonayaa inaan go'aansado waxa xiga, waxa uu daryeelkaygu u eekaan doono. Aan kaaga waramo rabitaankayga.
- » Ilaa markuu dhintay (qaraabo ama saaxiib dhaw), waxaan ka fikirayay sidaan u doonayo inay noloshaydu ku dhamaato.
Waxaan ogahay inay adag tahay in sheekadaa aad maqashaa, balse waxaan doonayaa inaan kuu sheego rabitaankayga daryeelkayga caafimaad iyo daawayntayda. Tani waa hadyad aan ku siinayo si aanad kolba ugu wareerin waxa uu yahay rabitaankaygu.
- » Sidaad ogtahayba, markasta oo aad waynaato, waxa kugu badanaysa sidaan baylahdaada u dayactiri lahayd. Aniga daryeelka caafimaad baylahdaa ayuu iigu jiraa. Aad ayaan uga fikirayay arintaa, waxaana buuxiyaya waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee dhakhtarkayga iyo go'aan qaatahayga badalka ahba u sheegeysa noocda daryeelka caafimaad iyo daawaynta uu rabitaankaygu yahay. Waxaan doonayaa inaan arintan kuugu sheego si aad uga caawiso sidii ay go'aanadu ugu dhici lahaayeen sidaan wax u doonayay.

Uga Waramida Dhakhtarka iyo Daryeelka Caafimaad Bixiyaha

Markaad u sheegeyso dhakhtarkaaga iyo daryeelka caafimaad bixiyahaaga rabitaankaaga daryeelka caafimaad iyo daawayntaada, waa inaad:

- » Ka dalbataa sharax ikhtiyaarada daryeelka caafimaad iyo daawaynta murugu kaaga jiro.
- » Waa inaad kala hadashaa ikhtiyaarada maamulida damqashada.
- » Waa inaad u sheegto dhakhtarkaaga in aad buuxisay waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah.
- » Waa in aad hubisaa inay tixgalin doonaan dhakhtarkaaga iyo daryeelka caafimaad bixiyahaagu rabitaankaaga daryeelka caafimaad iyo daawayntaada waana inaad ikhtiyaaro kale eegtaa hadii ayna tixgalinaynin rabitaankaaga sharciga, anshax ama sababo shakhsi ahaan.
- » Sii nuqul waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee aad buuxisay.

Suaalaha ay tahay inaad waydiiso dhakhtarkaaga iyo daryeelka caafimaad bixiyahaaga kale:

- » Si sareexo ah oo toos ah diyaar ma u tahay inaad aniga iyo dadka iga dhadhaw xanuunkayga iyo daryeelkayga caafimaad iyo daawayntayda aad ugala hadasho?
- » Go'aan sidee ah oo daryeelka caafimaad iyo daawayn ah ayaa loo baahan doonaa in la qaato, talo sidee ayaanad isiinaysaa si ay iiga caawiso aniga iyo dadka igu dhaw inay go'aanka qaataan?
- » Maxaad samayn lahayd hadii aan leeyahay xanuun badal ama xaalad adag ku jiro?
- » Ma ii sheegeysaa aniga iyo dadka igu dhaw hadii dawadu waxba ayna taraynin si go'aanka ku munaasabka ah dhamaadka noloshayda looga qaato?

Kala Sheekeysiga Dadka Kale Rabitaankooda Daryeelka Caafimaad iyo Daawayntooda

Xataa hadii aad wax kasta samayso si aad usoo bandhigto rabitaankaaga daryeelka caafimaad iyo daawayntaada, waxaa dhici kartaa inaad gashid kaalin ay tahay inaad dadka kugu dhadhaw aad kala hadasho rabitaankooda daryeelka caafimaad iyo daawayntooda. Markaad doonayso inaad qof kala hadasho sida uu u buuxin lahaa waraaqaha Tilmaamaha Horimariintiisa, ka duul kuma soo socda:

- » **Dooro Meesha ku Munaasabka ah:** Qorshee inaad kula sheekeysato meel aamusan, dagan oo aad si gaar ah oo aan la idinkasoo dhax galin aad ku sheekeysan kartaan.
- » **Waydiiso Fasax:** Fasax aad ka dalbanayso inaad kala hadli karto mawduucani waxa ay muujinaysaa inaad garaadka dadka kale qadarinayso, oo aad doonayso inaad dhagaysato rabitaankiisa daryeelka caafimaad iyo daawayneed. Qaababka fasaxa loo dalban karaa waa:
 - “Waxaan doonayaa inaad iiga sheekeysid sidii ay haboon tahay in lagu daryeelo hadii aad aad u xanuunsato. Caadi ma tahay?”
 - “Hadii aad xanuunsato, aad ayay warwar ii galin lahayd hadii aanan garanaynin nooca daryeelka aad doonayso. Iminka maka sheekeysan kartaa? Aad ayaan u jeclaan lahaa hadii aynu ka wada hadalno.
- » **Garo Wada Aad Filan Karto:** Maanka ku hay inaad sheekadan u bilawday maadaama oo badbaado qabka qofkan aad danaynayso. Way adagyihiin sheekadani in badanaa laga sheekeysto. Sug inay qofka kale ka timaado. Isku day inaad dareen diiran oo ay ku dheehan tahay shuruuc danayn aan sheekada kaga gurto adiga oo tusaya danayn iyo jacayl

Fiiro gaar ah

Qeexida Mabaadii'da iyo Rabitaanka

Jawaabaha suaalahani waxay kaa caawin karaan rabitaankaaga daryeelka caafimaad iyo daawayntaada ee ku duugan waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah.

Sideen doonayaa in la ii xasuusto?

Dadka xasuus sidee ah inay igu yaqaanaan ayaan doonayaa?

Dhacdo nololeed oo sidee ah ayaa i faan galisa oo aan ku farxaa?

Dhacno nololeed oo sidee ah ayaa I murugo galisa oo aan ka qoomamoodaa?

Maxaa noloshayda macne sameeya? Maxaa igu wayn?

Maxaa muhiim ah ee ay tahay inay dadka kale iga ogaadaan rabitaankayga diimeed?

Maxaa i baqi galiya ee inaan xanuunsado ama dhinto?

Walaac sidee ah ayaan ka qabaan inaan go'aan ka gaadho dhamaadka noloshayda?

Maxaan ku niyad samahay? Daryeel noocee ah ayaan doonayaa hadii aan aad u xanuunsado ama ay dhamaadka noloshaydu soo dhawaato?

Hadii aan maanta sii qorshayn karo, sidee ayay malinta ama todobaadka ugu danbeeya noloshaydu u eekaan lahayd?

Tixraac

- American Bar Association. (2011). Gudida Agabka Sharciga iyo Da'da ee: Sidaad U Dooranayso Wakiilka Daryeelka Caafimaad ama Proxy. Dib u eegid June 20, 2011 laga bilaabo http://www.americanbar.org/groups/law_aging/resources/consumers_toolkit_for_health_care_advance_planning.html.
- Xarunta Dhaqangalka Bioethics. (2012). Sheekada Danaynta: Shaacida Rabitaankaaga Daryeelka Caafimaad. Dib u eegid June 25, 2012 lagabilaabo <http://www.practicalbioethics.org/resources/caring-conversations.html>.
- Harrold, J. & Lynn, J. (1999). Buuga Basharka: Tilmaamaha Dadka Xanuunada Xun Xun Hayaan. Joornaalka Jaamaca Oxford: New York, NY. Sharuucda Iowa (2011).
- Sharciga Gobolka Iowa 144A-1 Sharciga Waxyaabaha Noloshu Dheeraysiiya. Lasoo saaray June 20, 2011 lagabilaabo. <http://search.legis.state.ia.us/NXT/gateway.dll?f=templates&fn=default.htm>.
- Hay'ada Daryeelka Caafimaad ee Guriga iyo Xanuun La Tacaalida Qaranka (NHPCO). (2010). Xidhiidhka Daryeelka: Sidaan Ugala Hadlaysid Daryeelka Caafimaad Bixiyahaaga. Lasoo saaray June 20, 2011 lagabilaabo. <http://www.caringinfo.org/i4a/pages/index.cfm?pageid=3281>.
- Hay'ada Daryeelka Caafimaad ee Guriga iyo Xanuun La Tacaalida Qaranka (NHPCO). (2011). Xidhiidhka Daryeelka: Sida Dadka Kale Loogala Hadlo Dhamaadka Noloshooda. Lasoo saaray June 20, 2011 lagabilaabo. <http://www.caringinfo.org/i4a/pages/index.cfm?pageid=3282>.
- Shuruucda Nebraska. (2011). Sharciga Dib u Eegida Lagu Sameeyay ee Nebraska 30-3402: Cadaynta Shuruudaha. Lasoo saaray June 20, 2011 laga bilaabo <http://nebraskalegislature.gov/laws/statutes.php?statute=30-3402>.
- Shuruucda Nebraska. (2012). Sharciga Dib u Eegida Lagu Sameeyay ee Nebraska 30-2209: Sharaxa Guud Lasoo saaray June 25, 2012 laga bilaabo <http://www.legislature.ne.gov/laws/statutes.php?statute=30-2209>.

Kaadhka Boorsada Jeebada

Jar oo buuxi kaadhka hoose. Laba iskugu lab kaadhka oo ku rid boorsada jeebka ama boorsada aad markasta qaadata, oo meel kula rid liisankaaga ama kaadhka caymiskaaga caafimaad. Kaadhka kale waxaad ku ridan kartaa talaajada, khaanad gaadhiga, boorsada jeebka ee labaad, ama meel kale oo aad degdeg uga soo saraan karto.

Attn: Daryeelka Caafimaad Bixiyaha (Healthcare Providers)
Magacaygu waa (My name is) _____
Waxaan sameeyay Tilmaamaha Horimarinta ah ee soo socda:
(Sax mid ama waxkabadan, kolba siday munaasab ugu yihiin)

____ Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee Daryeelkayga Caafimaadka iyo Daawayntayda Guud.
____ Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee Daryeelka Caafimaad iyo Daawayneed ee Xanuunada Maskaxda
____ Waxkale: _____

HALKAN LA

Fadlan la Xidhiidha (Please Contact): _____
(Magaca) (Name)

at _____ wixii xog ah ee dheeraad ah.
(Taleefan) (Telephone)

(Saxeex)(Signature) (Taariikhda)(Date)

Attn: Daryeelka Caafimaad Bixiyaha (Healthcare Providers)
Magacaygu waa (My name is) _____
Waxaan sameeyay Tilmaamaha Horimarinta ah ee soo socda:
(Sax mid ama waxkabadan, kolba siday munaasab ugu yihiin)

____ Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee Daryeelkayga Caafimaadka iyo Daawayntayda Guud.
____ Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee Daryeelka Caafimaad iyo Daawayneed ee Xanuunada Maskaxda
____ Waxkale: _____

HALKAN LA

Fadlan la Xidhiidha (Please Contact): _____
(Magaca) (Name)

at _____ wixii xog ah ee dheeraad ah.
(Taleefan) (Telephone)

(Saxeex)(Signature) (Taariikhda)(Date)

Attn: Daryeelka Caafimaad Bixiyaha (Healthcare Providers)
Magacaygu waa (My name is) _____
Waxaan sameeyay Tilmaamaha Horimarinta ah ee soo socda:
(Sax mid ama waxkabadan, kolba siday munaasab ugu yihiin)

____ Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee Daryeelkayga Caafimaadka iyo Daawayntayda Guud.
____ Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee Daryeelka Caafimaad iyo Daawayneed ee Xanuunada Maskaxda
____ Waxkale: _____

HALKAN LA

Fadlan la Xidhiidha (Please Contact): _____
(Magaca) (Name)

at _____ wixii xog ah ee dheeraad ah.
(Taleefan) (Telephone)

(Saxeex)(Signature) (Taariikhda)(Date)

Attn: Daryeelka Caafimaad Bixiyaha (Healthcare Providers)
Magacaygu waa (My name is) _____
Waxaan sameeyay Tilmaamaha Horimarinta ah ee soo socda:
(Sax mid ama waxkabadan, kolba siday munaasab ugu yihiin)

____ Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee Daryeelkayga Caafimaadka iyo Daawayntayda Guud.
____ Waraaqaha Tilmaamaha Horimarinta ah ee Daryeelka Caafimaad iyo Daawayneed ee Xanuunada Maskaxda
____ Waxkale: _____

HALKAN LA

Fadlan la Xidhiidha (Please Contact): _____
(Magaca) (Name)

at _____ wixii xog ah ee dheeraad ah.
(Taleefan) (Telephone)

(Saxeex)(Signature) (Taariikhda)(Date)



1-800-253-4368
CHIhealth.com